Geedka Tansy Ragwort

Senecio jacobaea Ka Tirsan Qoyska Sunflower

Cawska Sunta ah ee Heerka B: Xakamayn ayaa la Rabaa

Tilmaamo lagu Aqoonsado

- Geedaha yaryari waxay leeyihiin caleemo hoose oo wareegsan oo aan habaysnayn
- Geedaha qaangaarka ah waxay soo saaraan jirido caleen oo kale oo ubax soo bixiya oo sida caadiga dhererkoodu yahay 2 ilaa 4 feet
- Ubuxu wuxuu u eg yahay sida ka daisy loo yaqaan oo kale isagoo leh ubaxyo jaalle dhexduna tahay jaalle
- Caleemaha dushoodu waa madow cagaar xigeen ah, oo hoosta ku leh cagaar caddaan oo kale ah, oo aad u kala go'an, oo leh ilko isku soo wareegsan oo aan sinayn, oo muuqda in aanu habaysnayn
- Inta badan waxaa lagu qaldaa ubaxa caadiga ee loo yaqaan tansy (*Tanacetum vulgare*), kaasi oo leh ubax u eg badhanka oo siman, oo aan ubax lahayn (Fiiri halka dambe).

Geedaha yaryar ee tansy ragwort waxay leeyihiin caleemo hoose oo wareegsan oo aan habaysnayn.

Bayoolajiga

Sida caadiga ah waa geed ku baxa laba sano, isagoo sannadka-labaad ubax soo saara. Wuxuu soo saaraa ilaa 150,000 oo iniinyo ah geedkiiba; iniinyaha waxaa baahiya dabaylaha, marka la jaro ama waxaa qaado xayawaanka. Iniinyuhu waa kuwo awood u leh in ay carrada ku jiraan muddo ilaa 10 sano ah. Ubuxu wuxuu soo baxaa bartamaha bisha Juun ilaa Oktoobar dhexdooda, iniinyuhu waxay bilaabaan in ay samaysmaan Ogoosto dhexdeeda.

Calaamadaha lagu garto: jirido caleen leh, oo ubax soo bixiya; sida caadiga wuxuu dhererkoodu gaaraa 2-4 feet; iyagoo leh ubax jaalle, oo u eg ka daisy loo yaqaan oo kale.

Saameynta

Wuxuu sun soo gaarsiiyaa lo'da, fardaha, iyo kuwo ka mid ah riyaha, xayawaanka la dhaqdo iyo dadka; calaamadaha lagu garto waxaa ka mid ah barar, xuubka jirka oo barara, shuban, saxarada oo dhiig yeelata, duub adag iyo dheecaan badan oo jirka ku jira. Wuxuu barakiciyaa cawska iyadoo ay la xiriirto isagoo si aad ah u baxa. Wuxuu dhaawacaa beerka iyadoo ay ugu wacan tahay waxyeello ay noolaha soo gaarsiiso.

Faafidda

Wuxuu asal ahaan ka soo jeeda Yurub, aadna uguma baahsana Galbeedka Maraykanka. Degaan ahaan meelaha laga helo, ee uu aadka iskugu urrursan yahay waxaa ka mid ah meelaha miyiga ah ee koonfurta iyo bariga Degaanka King iyo Jasiirada Vashon. Wuxuu jecel yahay qoraxda iyo meelaha bannaan ee leh carrada qoyan ee dhexdhexaadka ah iyo ta qalalan. Wuxuu si dhakhso ah u qabsadaa meelaha bannaan, wadooyinka agtooda iyo dhulka aadka loo daaqay.

Maxaad Samayn Kartaa

Naga caawi in aan joojino faafidda cawskan khatarta ah. Hantidaada iyo meelaha jidadka u dhow ka fiiri geedaha ubaxa bixinaya. Joojinta soo bixida iniinta iyo baabi'inta geedaha hada jira, waxaan geedkan sunta ka dhigi karnaa in aanu dhibaato u geysan xayawaanka. La xiriir Barnaamijka Xakamaynta Cawska Sunta ah haddii aad geedka tansy ragwort ku aragto jidadka ama hanti kuu dhow, gaar ahaan meelaha ay fardaha iyo xayawaanka kale daaqayaan.

Su'aalo?
Khadka Barnaamijka Xakamaynta Cawska Sunta ah ee Degaanka King.:
206-477-WEED www.kingcounty.gov/weeds

Hababka loo Xakamaynayo

Haddii aad ogaato in hanti aad leedahay uu ka baxo geedka tansy ragwort, waxaad doorataa hababka loo xakamaynayo ee hoosta lagu sharaxay mid ka mid ah ama labadooda. Inta badan hababka loo xakamaynayo waa in la isticmaalaa sanado badan si ay u noqdaan kuwo lagu guulaysto iyadoo sababta tahay iniinyaha oo carrada ku noolaado wakhti dheer.

Ubaxa u eg ka daisy loo yaqaan oo kale waxaa laga helaa geedka tansy ragwort, sida caadiga ahna wuxuu leeyahay 13 qaybood oo ubaxyo ah.

Ka hortagga:

Si joogta ah cawska uga fiiri carrada wax la kor saaro, cawska iyo iniinta degaannadaada ka baxsan; baabuurta nadiifta ah iyo qalabka. Waxaad wakhtiga gu'ga fiirisaa (geedaha yaryar) oo leh caleemo soo wareegsan. Dib wax ugu beer dhulka bannaan iyo dhulka daaqa ah.

Gacanta laga qabanayo:

Geedka dhammaantiis dhulka ka soo qod sida xididada; jirada soo biqlaysa iyo ubaxa si sahlan ayaa dhulka looga qodi karaa marka loo eego caleemaha soo wareegsan. Ubuxu sidoo kale wuu soo bixi karaa marka dhulka laga soo saaro ka dib, sidaa darteed ubaxa jirida bac ku rid oo tuur. Ubaxa jirida ama iniinta ha ku ridin qashin qubka barxada taala.

Farsamo:

In wax laga beero dhul ballaaran ayaa raad fiican yeelan kara laakiin waxaa laga yaabaa marka hore in iniinyo badani ka soo biqlaan. Jarida la jarayo waxay dhiirigelin madaxa sare ee xididada iyo geesahooda. **Digniin: geeduhu mar kale ayay ubaxa soo bixin doonaan marka la jaro ka dib.**

Dabeecad ahaan:

Daaqa oo si fiican loo meeraayo waxaa bannaanka u saaraa geedaha aan loo baahnayn. Dib wax ugu beerida dhulka ee cawska daaqa ah ee sida aadka u baxaa waxay keeni kartaa in uu keeno tartan iyo hoos u dhac ku yimaada soo bixida iniinta geedka tansy ragwort.

Kiimikada:

Isticmaalida kiimikada wax lagu buufiyo waxay taageero ka geysan kartaa in la xakameeyo in geedku dhulka ka buuxsamo. **Waxaad raacdaa astaamaha ku qoran ee nidaamka la raacayo taasi oo ay ka mid tahay xayiraadaha ka jirta dhulka daaqsinta ah iyo deegaanka.** In si fiican loo xakameeyaa waxaa ujeedadeeda la gaaraa iyadoo wakhtiga gu'ga iyo mar kale wakhtiga dayrta la buufiyo caleemaha soo wareegsan iyadoo la isticmaalayo kiimiko qorshaysan oo la soo xushay si ayna cawska kale dhibaato ugu geysan. Kiimikada gaarka ah ee wax lagu buufiyaa ee saameynta leh waxaa ka mid ah, 2, 4-D, triclopyr iyo aminopyralid. Kiimikada aan wax gaar ah loogu talagalin ee wax lagu buufiyo ee Glyphosate waxaa loo isticmaali karaa meelaha cawsku ku urrursan yahay ama meesha dhaawaca soo gaaray cawsku uu yar yahay ama dib loo abuurayo.

Waxaad raacdaa dhammaan sharciyada loogu talagalay marka kiimikada loo isticmaalayo goobaha xasaasiga iyo meelaha u dhow. Mararka qaarkood, waxaa loo baahnaan doonaa in la haysto ogolaansho ama ruqsad gaar ah. Geedaha ha jarin ka hor ama ka dib marka la buufiyo si kiimikada qorshaysan ee wax lagu buufinayaa ay saameyn u yeelato. Xoolaha ka fogee geedaha la buufiyay ilaa muddo 1-2 toddobaad ah ama sida ay dhigayso astaamaha la qoray, hadba kii wakhtigeedu dheer yahay. Kala xiriir Barnaamijka Xakamaynta Cawska Sunta ah ee Degaanka King wixii la xiriira talooyinka goob gaar ah iyo kiimiko wax lagu buufiyo.

Geedka tansy ee caadiga ah waxaa inta badan lagu qaldaa geedka tansy ragwort, gaar ahaan ka baxa hareeraha waddooyinka.

Suuro galnimada in la isku qaldo:

Geedka Tansy ee caadiga ah *(Tanacetum vulgare)* waa caws leh sun ah aad u baahsan oo inta badan si wadajir ah ula baxa geedka tansy ragwort.

Si ka duwan geedka tansy ragwort, xooluhu way iska ilaaliyaan geedka urta daran leh. Geedka tansy ee caadiga ah waxaa si sahlan loogu garan karaa midabkiisa jaallaha ah, ubaxa qaybtiisa sare ee u eg badhanka ee aan ubaxa lahayn. In la xakameeyo looma baahna geedka caadiga ah ee tansy, laakiin talo ahaan ayaa lagu soo jeedinayo.

Ubaxa u eg badhanka ee geedka tansy ee caadiga ah.

Somali
December 2015

206-477-WEED (206-477-9333) ama TTY: 711
kingcounty.gov/weeds noxious.weeds@kingcounty.gov

King County

File: 1602_5213L_NoxWfact_TansyRagwort_SM.indd